Oregon Health Authority

QAYBTA CAAFIMAADKA

Su'aalaha Aalaaba La Isweydiiyo (FAQ): Ka Dilaacida COVID-19 Goobaha Shaqada

S1. Waa maxay dillaaca cudurka COVID-19?

J1. Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) wuxuu ku qeexaa dillaaca COVID-19 inuu yahay mid…

Labo kiis ama ka badanoo ku dhaca COVID-19 gudaha 14 maalmood oo wadaaga xiriirka cudurka faafa

Xiriirka Cudurka Faafa: Meel ama qof ay dadka laga helo COVID-19 ay wadaagaan

S2. Maxay OHA u sheegaan dillaaca COVID-19 ee goobaha shaqada ee shanta kiis ama ka badan?

J2. Inkastoo OHA ku qeexaan dillaaca cudurrada ugu yaraan laba kiis oo laga helo qoysas kala duwan, waxaan shaaca ka qaadnaa goobaha shaqo oo leh shan kiis ama ka badan maxaa yeelay tani waxay bixineysaa caddeyn ah inuu jiro isku gudbin ka dhex jirta kooxdan shaqaalaha ah, halkii ay ka ahaan lahayd gudbin bulshada ku baahsan.

S3. Waa maxay xiriirka cudurka faafa, ee loo yaqaano epilink?

J3. Xiriirka cudurka faafa waa goob ama qof ama koox dad ah oo laga helay COVID-19 ay wadaagaan, sida goobta shaqada ama xubin qoyska ka mid ah. Waxay u adegtaa sidii xiriiriyaha ama isku-xirka ka dhexeeya dadka la xaqiijiyay inay qabaan COVID-19.

S4. Waa maxay sababta goobaha qaarkood loo sheegayo inay yihiin goobta cudur dillaaca?

J.4 OHA waxay magacaawday ganacsiyada leh shan qof ama ka badan oo qaba COVID-19:

1. ee lala xiriirinayo hal goob shaqo (goob) *oo*

2. dhacay muddo gudaheeda (Hal ama ka badan ee ka helida COVID-19 gudaha 14 maalmood)

Dadkaani waxay noqon karaan shaqaale, dad xiriir dhow leh, ama xubno ka tirsan qoysaskooda. Shakhsiyaadkaani daruuri ma ahan inuu ku dhaco COVID-19 iyagoo jooga goobta shaqada, balse goobta shaqada ayaa ah *xiriirka cudurka faafa ee la wadaago*.

Xiriir dhow waxaa loola jeedaa u jirsato gudaha lix cagood qof qaba COVID-19 ugu yaraan 15 daqiiqo isugeyn ahaan.

S5. Maxay OHA ugu dhawaaqaan dillaca cudurrada gebi ahaanba?

J5. Soo sheegista dadweynaha dillaaca cudurrada waxay dadka ka caawi kartaa inay si wanaagsan u fahmaan sida isku gudbinta cudurka uga dhex dhacayo bulshooyinkooda. Tusaale ahaan, haddii ay si lama filaan ah kiisas badan oo dheeraad ah uga dhacaan degmo yar, soo sheegista cudur dillaaca goob shaqo oo kiisas badan oo cusub leh ayaa si fiican u muujin karta sababta kiisasku u kordheen.

S6. Maxaad ugu dartay xubnaha qoysaska ama xiriirada dhow ee shaqaalahayga tirada kiisaskayaga?

J6. Iyadoo ugu wacan tahay in dillaaca cudurrada ay go'aamiyaan xiriirada cudurrada faafa, qof kasta oo laga helo COVID-19 oo xiriir la leh xiriiradaasi cudurrada faafa ayaa lagu tiriyaa wadarta dillaaca cudurka.

S7. Maxaad ugu dhawaaqin goobaha shaqada ee leh in ka yar 30 shaqaale?

J7. Ilaalinta macluumaadka caafimaad ee Reer Oregon waa ahmiyada ugu sareysa leh waxaana faraya sharciga, sidaas darteed OHA ma baahiso macluumaadka kooxaha yaryar waayo waxaa suurtagal ah in la garto shaqsiyaadka qaba wax cudur ah.

Sababtan darteed, OHA sidoo kale ma soo sheegto tirada kiisaska khaaska ah haddii in ka badan 50% shaqaalaha laga helo cudurka. Marka laga hadlayo xaaladahaan, dillaaca cudurrada ayaa la soo sheegaa iyadoo aan la tirin kiisaska.

S8. Miyaa qof qaba cudurka COVID-19 lala xiriirin karaa in ka badan hal dillaaca cudurka ah?

J8. Haa. Qofka qaba COVID-19 waxaa laga yaabaa in lala xiriiriyo cudur dillaac badan. Tusaale ahaan, labada qof ee isqaba waxay wada qabi karaan COVID-19. Hadduu lammaane kasta gootiisa shaqada ka dillaaco cudurka, mid walba waxaa lagu tirin doonnaa labada cudur dillaacisba.

S9 Haddii dadka lagu tiriyo laba cudur dillaac, miyaa sidoo kale lagu tirinayaa laba jeer tirada degmada/gobolka?

J9. Maya. Qofka laga helo cudurka waxa lagu tiriyaa hal mar, kaliya hal deegaan. Xiriirada cudurka faafa ayaa lagu daraa kiis kasta si ay nooga caawiyaan qiimeynta qaababka iskuu gudbinta, oo in ka badan hal ayaa si macno leh loogu dabaqi karaa kiis jira.

S10. Maxaysan OHA u qorin shaqaalaha iyo xiriirada dhow?

J10. Waxaan qiimeyneynaa ilaalinta aqoonsiyada shaqsiyaadka. Bixinta magacyada dadka laga helo cudurka ama laga yaabo inay jirran yihiin waxay u horseedi kartaa natiijooyin aan wanaagsaneyn iyaga iyo qoysaskooda.

S11. Intee in le'eg ayaa loo arkaa inay cudurrada dillaca socdaan ama furan yihiin?

J11. OHA waxay ka dhigaan dillaaca cudurrada kuwo furan 28 maalmood laga bilaabo maalinta ugu dambaysay ee bilaabashada astaamaha cudurka si ay ula socdaan kiisaska cusub. Tiradan waxay ku saleysan tahay labakal-huuris (14 maalmood) ee cudurka COVID-19. Haddii aysan jirin kiisas cusub 28 maalmood gudahooda, waxaan si macquul ah u rumeysan karnaa kiisaska soo socda inaysan xiriir la laheyn dillaacii hore.

S12. Sidee ayaan ku ogaan karnaa inaan baxnay 28-da maalmood?

J12. Haddii tirada kiiska ee goobta shaqada aysan isbeddelin muddo 28 maalmood ah, dillaaca cudurka ayaa loo qaddarin doonnaa in la xalliyay waxaana loo gudbin doonnaa qeyb kale oo ka mid ah warbixinta. Si kastaba ha noqotee, tani micnaheedu ma ahan in mustaqbalka uusan cudurka dillaaci karin.

S13. Miyay xiriirada qayb ka yihiin muddada 28-da maalmood?

J13. Haa, haddii xiriirada lagu daray baaritaanka asalka ah ee dillaca cudurka, OHA way tixgelin doonaan inta lagu jiro muddada 28-da maalmood.

S14. Waa maxay sababta warbixinta OHA u xallisay dillaaca cuddurada imminka?

J14. Go'aanka lagu sheegayo goobaha shaqooyinka waaweyn waxaa ku dhawaaqay Agaasimaha OHA Pat Allen markay ahayd 28-dii Maayo. Waxaad ka akhrisan kartaa wax ku saabsan ogeysiintaas barta curethoregon.org/coronavirus iyo adoo gujinayo “COVID-19 news.”

S15. Maxay OHA u sheegi waayeen kaniisadaha kuwaasoo ah goobo si ballaaran uga dillaci karo cudurka?

J15. OHA wali ma aysan ogaan wax ururo diimeed ah oo loo tixgelin karo inay leeyihiin goobo shaqo oo leh in ka badan 30 shaqaale. OHA waxay si joogto ah ugu qortaa dillaca cudurrada ee ballaaran ee ka dhaca goobaha kala duwan wargeysyadayada.

S16. Maxaysan OHA uga warbixinin tirada shaqaalaha, tirada dadka xiriirka dhow leh iyo tirada xubnaha qoyska ee shaqaalaha jooga goob kasta oo shaqo oo cudurku ka dillaco?

J16. Waxaan qiimeyneynaa ilaalinta aqoonsiyada shaqsiyaadka. Goobaha shaqada qaarkood, shaacinta macluumaadkan waxay horseedi kartaa aqoonsiga shaqsiyaadka qaba cudurka ama laga yaabo inay jirran yihiin oo intaasi waxaa sii dheer inay tahay shaacin aan la oggolaan ee macluumaadka caafimaadka gaarka ah, waxay u keeni kartaa natiijooyin xun iyaga iyo qoysaskooda.

S17. Goorma ayaa xogta lagu daraa war-saxaafadeedka maalinlaha ah ee OHA ama Warbixinta Toddobaadlaha ah ee OHA?

J17. Marka dillacyada cudurka ee goobta shaqada gaaro 20 kiis ama ka badan, dillaca cudurka ayaa lagu sheegaa maalinta xigta war-saxaafadeedka maalinlaha ah.

Xogta loogu talagalay Warbixinta Toddobaadlaha ah ee COVID-19 waxaa la codsadaa 11 habeennimo. Habeennada Axadda. Hadduu dillaaca cudurka ee goobta shaqada gaaro shan kiis ama ka badan inta u dhaxeysa Axadda iyo subaxnimada Talaadada, waxaa lagu sheegi doonnaa Warbixinta Toddobaadlaha ah ee COVID-19 ee Arbacada, sidaas darteed goobaha shaqadu waxay leeyihiin ugu yaraan ogeysiis 24 saac ah kahor inta aan lagu sheegin warbixinta. Haddii dillaaca cudurka ee goobta shaqada uu gaaro shan kiis (balse ka yar yahay 20) kadib markii Warbixinta Toddobaadlaha ah ee COVID-19 la daabaco Arbacada, waxaa lagu soo qaadi doonnaa warbixinta Arbacada soo socota.

Helitaanka dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsoha.state.or.us.